

**XAASHIDA XAQIIQDA EE LOOGU TALAGALAY DADKA QAATA IYO  
BIXIYEYAASHA TALLAALKA PFIZER-BIONTECH COVID-19 IYO PFIZER-  
BIONTECH COVID-19**

**TALLAALKA, BIVALENT (ASALKA IYO OMICRON BA.4/BA.5) SI LOOGA  
HORTAGO CUDURKA CORONAVIRUS 2019 (COVID-19) EE LOOGU  
TALAGALAY INAY ISTICMAALAN SHAKHSIYAADKA  
5 ILAA 11 SANO JIRKA AH**

**DADKA JIRA 5 ILAA 11 JIRKA**

**Canugaaga waxaa la siinayaa Tallaalka Pfizer-BioNTech COVID-19<sup>1</sup> ama Tallaalka Pfizer-BioNTech COVID-19, Bivalent (Asal ah iyo Omicron BA.4/BA.5)<sup>2</sup>, oo halkaan loogu yeero Tallaalka Pfizer-BioNTech COVID-19, Bivalent si looga hortago Cudurka Coronavirus 2019 (COVID-19) oo uu sababay SARS-CoV-2.**

**Xaashidaan Xaqiiqda ee loogu talagalay Dadka Qaata iyo Bixiyeyaasha tallaalka waxay ka kooban tahay Xaashida Xaqiiqda ee loogu talagalay Tallaalka la ogolaaday ee Pfizer-BioNTech COVID-19<sup>3,4</sup> iyo Tallaalka Pfizer-BioNTech COVID-19, Bivalent ee loogu talagalay dadka jira 5 sano ilaa 11 sano.**

1 Tallaalka Pfizer-BioNTech COVID-19, waa tallaalka monovalent, wuxuu diraa borootiinka halka qodax leh ee kaliya fayraska Asalka ah ee SARS-CoV-2.

2 Tallaalka Pfizer-BioNTech COVID-19, Bivalent wuxuu diraa borotiinka qodaxda leh ee fayraska Asalka ah ee SARS-CoV-2 iyo Omicron BA.4/BA.5 SARS-CoV-2.

3 Waxaa dhici karta inaad hesho Xaashidan Xaqiiqda xitaa haddii ilmahaagu jiro 4 sano. Carruurta gaaraysa da'da laga bilaabo 4 sano jir ilaa

5 da'doodu u dhaxaysa garoojo kasta oo ka mid ah taxanaha aasaasiga ah waxay qaadan karaan taxane aasaasi ah oo 2 garoojo ah oo ah Tallaalka Pfizer-BioNTech COVID-19 ee loo ogolaaday in loo isticmaalo dadka jira 5 sano ilaa 11 sano. Carruurta gaareysa da'da 4 sano ilaa 5 sano kuurooyin kuwii ay ahaadaanba ee ka tirsan taxanaha aasaasiga ah, kuwaasi oo loo bilaabi doono taxane aasaasi ah oo 3 garoojo ah oo ah Tallaalka Pfizer-BioNTech COVID-19 ee loo ogolaaday in loo isticmaalo dadka jira

6 bilood ilaa 4 sano, waxay qaadan karaan Tallaalka Pfizer-BioNTech COVID-19 ee loo ogolaaday in loo isticmaalo dadka jira 5 sano ilaa 11 sano kuurooyinka 2 iyo/ama 3.

4 Waxaa dhici karta inaad hesho Xaashidan Xaqiiqda xitaa haddii ilmahaagu jiro 11 sano. Carruurta ka gudbi doona 11 jir una gudbaya 12 jir marka la eego garoojooyinka aasaasiga ah waxay heli karaan, marka la eego wax kasta oo ka mid ah garoojada aasaasiga ah, midkood: (1) Tallaalka COVID-19 ee Pfizer-BioNTech ee loo ogolaaday isticmaalka dadka 5 jirka ilaa 11 jirka u dhexeeya; ama (2) COMIRNATY (Tallaalka COVID-19, mRNA) ama Tallaalka COVID-19 ee Pfizer-BioNTech ee loo ogolaaday isticmaalka dadka da'doodu tahay 12 sano jir iyo wixii ka wayn.

**Tallaalka Pfizer-BioNTech COVID-19 wuxuu Ogolaanshaha Isticmaalka Degdegga ah (EUA) ka helay Maamulka Cuntada iyo Dawada ee Mareykanka (FDA) si loo bixiyo:**

- laba garoojo oo taxane ah oo aasaasi ah oo loogu talagalay shakhsiyaadka da'doodu tahay 5 sanno ilaa 11 sanno.
- garoojo taxane ah oo aasaasi ah oo saddexaad dadka da'doodu tahay 5 sano ilaa 11 sano ee qaba noocyo gaar ah oo liidashada difaaca ah.

**Tallaalka Pfizer-BioNTech COVID-19, Bivalent wuxuu ka helay oggolaanshaha Isticmaalka Xaaladda Degdegga ah FDA si uu u siiyo mid ahaan:**

- xoojiye qura kuuradiisa oo loogu talagalay dadka jira 5 sano ilaa 11 sano ugu yaraan 2 bilood kadib dhammaysiga tallaalka aasaasiga ah ee tallaalka kasta oo monovalent ah oo la ogolaaday ama laansixiyey, tallaalka COVID-19; ama;
- hal garoojo oo xoojiye ah oo loogu talagalay shakhsiyaadka da'doodu tahay 5 jir ilaa 11 jir ugu yaraan 2 bilood kadib marka laga qaato garoojada xoojinta ah ee ugu dambaysa mid un ka mid ah tallaalka monovalent ee COVID-19 oo la ogolaaday ama la ansixiyay.

---

Xaashidan Xaqiiqda waxaa ku qoran macluumaad kaa caawinaya inaad fahamto halisaha iyo faa'idooyinka Tallaalka COVID-19 ee Pfizer-BioNTech iyo Tallaalka COVID-19 ee Pfizer-BioNTech, Bivalent, kaasi oo ay dhici karto in canugaagu qaato sababtoo ah hadda waxaa jira safmarka COVID-19. La hadal bixiyaha tallaalka ee canugaaga haddii aad qabto su'aalo.

Xaashidaan Xaqiiqda waxaa laga yaabaa in la cusbooneysiisay. Xaashida Xaqiiqda ee ugu dambaysay, fadlan ka fiiri [www.cvdvaccine.com](http://www.cvdvaccine.com).

**WAXA AY TAHAY INAAD OGAATO KA HOR INTA CANUGAAGU UUSAN QAADAN WAX KA MID AH TALLAALADAAN**

**WAA MAXAY COVID-19?**

Cudurka COVID-19 waxaa sababa koroonafayras lagu magacaabo SARS-CoV-2. Waxaad ka qaadi kartaa COVID-19 taabashada qof kale oo qaba fayraska. Badi waa xanuun neef mareenka ku dhaca laakiin sidoo kale saamayn kara xubnaha kale. Dadka qaba COVID-19 waxay yeeshaan astaamo badan sida lasoo tebiyo, kuwaasi oo ka bilaabma astaamo fudud ilaa jirrooyin dhimasho keeni kara. Astaamuhu waxay soo bixi karaan 2-14 maalmood kadib markaad u baylahdo fayraska. Kuwaan waxaa ku jira: qandho ama qarqaryo; qufac; neefta oo kugu yar; daal; murqo ama jir xannuun, madax xanuun; lumida cusub ee dhadhanka ama urta; cune xanuun; calool istaag ama sanko oo diif ka dareeyo; lallabo ama mantag; shuban.

---

5 Monovalent waxaa loo yaqaan tallaalka kasta oo COVID-19 uu leeyahay oo la oggolaaday ama la ansixiyey oo uu ku jiro ama soosaara borotiinka qodaxda leh ee fayraska Asalka ah ee SARS-CoV-2 oo kaliya.

Si aad u hesho xog badan oo ku saabsan EUA, eeg **“Waa maxay Ogolaanshaha**

**Isticmaalka Xaaladda Degdegga ah (EUA)?**” qeybta ah dhammaadka Xaashidaan Xaqiiqada.

**WAA MAXAY WAXAAD U SHEEGI LAHAYD BIXIYAHA TALLAALKA EE CANUGAAGA KAHOR INTA UUSAN QAADAN MID KA MID AH TALLAALADAAN? U sheeg bixiyaha tallaalka dhammaan xaaladaha caafimaadka ee canugaaga, oo ay kujiraan haddii canugaaga:**

- uu qabo wax xasaasiyad ah
- uu qabo bararka murqaha wadnaha (caabuqa muruqa wadnaha) ama bararka xuubka sare ee wadnaha
- uu qabo qandho
- uu qabo cillad dhanka dhiigbaxa ah ama uu qaato daawo dhiigga khafiifiso uu qabo liidasho dhanka difaaca jirka ah ama qaato daawooyin saameeya nidaamkaaga difaaca ee canugaaga
- uu yahay qof dumar ah oo uur leh
- ay naasnuijinayso
- uu qaatay tallaalka kale oo loogu talagalay COVID-19
- waligii mar un suuxay kadib markii cirbad lagugu duray

**SIDEE TALLAALADAN LO BIXIYAA?**

Tallaalka COVID-19 ee Pfizer-BioNTech, iyo Tallaalka COVID-19 ee Pfizer-BioNTech, Bivalent waxaa lagaga mudi muruqa canugaaga asagoo cirbad lagula durayo.

Taxanaha Aasaasiga ah: Tallaalka Pfizer-BioNTech COVID-19 waxaa dadka loo siiyaa sidii taxane aasaasi ah. Tallaalka waxaa loo bixiyaa sidii taxane 2 kuuro ah, oo 3 asbuuc ay u dhexeyso. Taxane aasaasi ah oo saddexaad ayay dhici kartaa in la siiyo ugu yaraan 28 maalmood kadib garoojada labaad dadka qaba noocyo gaar ah oo difaaca liita ah.

Dooska Xoojinta ah:

Tallaalka COVID-19 ee Pfizer-BioNTech, Bivalent waxaa loo bixiyaa sidii garoojo xoojin ah oo mar kaliya ah ugu yaraan 2 bilood kadib:

- dhammaysiga tallaalka aasaasiga ah ee tallaalka kasta oo COVID-19 monovalent ah oo la oggolaatay ama la ansixiyey; ama
- helitaanka garoojada xoojinta ah ee ugu dambaysay ee tallaalka kasta oo koowaad oo COVID-19 loogu tala galay oo la oggolaaday ama la ansixiyay.

Tallaalku waxa laga yaabaa in uusan qof kasta ilaalin.

**YAAN HELAYNIN TALLAALKA COVID-19 EE PFIZER-BIONTECH AMA TALLAALKA COVID-19 EE PFIZER-BIONTECH, BIVALENT?**

Waa inuusan canugaagu qaadan wax ka mid ah tallaalkadan haddii uu:

- ka qaaday falcelin xasaasiyadeed oo daran kadib garoojada horey u qaadatay ee ah Tallaalka COVID-19 ee Pfizer-BioNTech
- uu dareencelin xasaasiyad daran ka qaaday wax kasta oo ka mid ah tallaalkadan.

## **WAA MAXAY WAXYAALAHA KU JIRA TALLAALADAN?**

Tallaalka Pfizer-BioNTech COVID-19 iyo Tallaalka Pfizer-BioNTech COVID-19, Bivalent waxaa kujira maadooyinka soo socda: mRNA, dufan (((4-hydroxybutyl)azanediyl)bis(hexane-6,1-diyl)bis(2-hexyldecanoate), 2 [(polyethylene glycol)-2000]-N,N-ditetradecylacetamide, 1,2-distearoyl-sn-glycero-3-phosphocholine, iyo kolesterool), tromethamine, tromethamine hydrochloride, sucrose, iyo cusbo (sodium chloride).

## **TALLAALADAN HOREY MA LOO ISTICMAALAY?**

Tijaabooyinka caafimaadka, qiyaastii 3,100 qof oo jira 5 sano ilaa 11 sano ayaa qaatay ugu yaraan 1 garoojo oo ah Tallaalka COVID-19 ee Pfizer-BioNTech. Malaayiin qof ayaa qaatay Tallaalka COVID-19 ee Pfizer-BioNTech iyagoo u maray oggolaanshaha Isticmaalka Xaaladda Degdegga ah (EUA) ilaa Diseembar 11, 2020.

Tijaabo caafimaad, qiyaastii 300 oo qof oo da'doodu ka wayn tahay 55 jir ayaa qaatay hal garoojo oo ah tallaalka bivalent kaasi oo ka duwan Tallaalka COVID-19 ee Pfizer-BioNTech, Bivalent maadaama uu isaga ku jiro qayb Omicron ah oo gooni ah.

## **WAA MAXAY FAA'IDOOYINKA TALLAALADANI?**

Tallaalka Pfizer-BioNTech ee COVID-19 waxaa la muujiyay inuu ka hortago COVID-19. FDA waxay ogolaatay Tallaalka COVID-19 ee Pfizer-BioNTech, Bivalent si looga helo difaac wanaagsan oo ka dhan ah COVID-19-ka uu keeno nooca Omicron ee SARS-CoV-2.

Mudada uu difaaci karo COVID-19 waqtigaan lama oga.

## **WAA MAXAY KHATARAHA TALLAALADAAN?**

Waa wax aan aad u badnayn in tallaaladani ay sababi karaan xasaasiyad daran. Xasaasiyad daran waxay caadiyan dhici kartaa dhowr daqiiqo gudahood ilaa 1 saac kadib qaadashada doos. Sababtaan darteed, bixiyaha tallaalka canugaaga ayaa weydiin kara meesha canugaaga uu kusoo qaatay tallaalka si uu ula socdo tallaalka kadib. Calaamadaha xasaasiyadda daran waxaa ku jiri kara:

- Neefsashada oo adkaata
- Barar wajiga iyo dhuunta ah
- Wadne garaac degdeg ah
- Firiiric xun oo ka soo yaaca jirka oo dhan
- Wareer iyo tabar darro

Bararka murqaha wadnaha (caabuqa muruqa wadnaha) ama bararka xuubka sare ee wadnaha (caabuqa xuubka sare ee wadnaha) ayaa ku dhacay dadka qaatay tallaalkaan qaarkii.

Tallaalka Pfizer-BioNTech COVID-19. Dadka intooda badan, astaamuhu waxay bilawdaan dhawr maalmood gudahood helitaanka dooska labaad ee tallaalka. In arrinkaani dhaco aad ayay u yartahay. Waa inaad daryeel caafimaad durba u raadisaa haddii wax kamid ah calaamadahaan aad ku aragto canugaaga markii tallaalkaan uu qaato kadib:

- Xabad xanuun
- Neef-qabasho
- In aad dareemeyso inay neeftaadu degdeg tahay, wadnaha oo ruxanaaya ama aad u garaacmaya

Waxyeelooyinka laga soo tabiyey tallaaladan waxa ka mid ah:

- Falcelinta xasaasiyadeed ee daran
- Xasaasiyadaha aan darnayn sida finanka, cuncunka, barbararka, ama bararka wajiga
- Bararka murqaha wadnaha
- Bararka xuubka sare ee wadnaha
- Xanuunka barta la muday
- Daal
- Madax-xanuun
- Xanuun murqaha ah Qarqaryo
- Kala-goysyo xanuun
- Qandho
- Barar barta la muday
- Casaansho barta la muday
- Lalabo
- Juucjuuc
- Qanjaha (lymph nodes) oo barara (lymphadenopathy)
- Himmadda cuntada oo yaraata
- Shuban
- Matag
- Cudud xanuun
- Diidid la dareemo marka qofka tallaalka lagu durayo

Waxaa dhici karta inaysan dhicin wax dhimaalada suurtagalka ah dhammaantood ee tallaaladaan. Waxyeello halis ah oo aan la fileyn ayaa dhici karta. Waxyeelooyinka suurtagalka ah ee tallaaladan wali waa la daraaseeyaa.

### **MAXAAN KA YEELAYAA WAXYEELADIISA?**

Haddii xasaasiyad daran uu canugaagu la kulmo, soo wac 9-1-1, ama aad isbitaalka kuugu dhow.

Wac bixiyaha tallaalka ama bixiyaha caafimaadka ee canugaaga haddii canugaaga ay kasoo gaaraan waxyeello dhiba ama aanan baxayn.

Usoo sheeg waxyeellada tallaalka FDA/CDC Nidaamka Soo Tebinta Dhacdada Daran ee Tallaalka (VAERS). Nambarka taleefanka ee lacag la'aanta lagu soo waco ee VAERS waa 1-800-822-7967 ama wax kusoo tebi <https://vaers.hhs.gov/reportevent.html>. Fadlan ku qor midkood “Oggolaansahaha Isticmaalka Xaaladda Degdegga ah ee Tallaalka COVID-19 ee Pfizer-BioNTech” ama “Oggolaansahaha Isticmaalka Xaaladda Degdegga ah ee Tallaalka COVID-19 ee Pfizer-BioNTech, Bivalent” laynka koowaad ee sanduuqa #18 ee foomka warbixinta.

Intaasi waxaa dheer, waxaad usoo tebin kartaa waxyeellada Pfizer Inc., adigoo isticmaalaya xogta xiriirka ee hoos lagu xusay.

Mareegta	Lambarka fakiska	Lambarka taleefoonka
<a href="http://www.pfizersafetyreporting.com">www.pfizersafetyreporting.com</a>	1-866-635-8337	1-800-438-1985

Waxaa sidoo kale lagu siin karaa xulashada aad isaga diiwaangalinayso v-safe. V-safe waa aalad cusub oo ikhtiyaari ah oo ku saleysan taleefannada casriga ah oo adeegsata farriimaha qoraalka iyo xog-uruurin mareegeed si loola socdo dadka la tallaalay oo loo aqoonsado waxdhimaalada iman kara kadib tallaalka COVID-19. V-safe waxay ku weydiin su'aalo kaa caawinaya CDC la socodka badqabka tallaalka COVID-19. V-safe wuxuu sidoo kale bixiyaa xasuusin kuuro labaad ku saabsan haddii loo baahdo taleefankana si toos ah loogu soo gudbin karo V-safe wuxuu sidoo kale bixiyaa dabagalka ay sameyso CDC haddii kaqeybgalayaashu ay soo sheegaan saameyn caafimaad oo weyn kadib talaalka COVID-19. Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan sida la isu diiwaan galiyo, booqo: [www.cdc.gov/vsafe](http://www.cdc.gov/vsafe).

**MAXAA DHACAYA HADDII AAN GO'AANSADO INAAN CANUGEYGA LA SIIN TALLAALKA PFIZER-BIONTECH TALLAALKA COVID-19 AMA TALLAALKA PFIZER-BIONTECH COVID-19, BIVALENT?**

Sida ku cad Ogolaansha Isticmaalka Degdegga ah ama EUA, waxaa jirta xulasho lagu aqbali karo ama lagu diidi karo qaadashada wax ka mid ah tallaalkaadaas. Haddii aad go'aansato in canugaagu uusan qaadan wax ka mid ah tallaalkadan, taasi baddalimayso daryeelka caafimaadka ee canugaaga ee heerka la wada aqbalay gaarsiisan.

**MA JIRAAN KHIYAARO KALE OO LOOGA HORTGO COVID-19 KA SOKOW TALLAALKA COVID-19 EE PFIZER-BIONTECH AMA TALLAALKA COVID-19 EE PFIZER-BIONTECH, BIVALENT?**

Tallaalo kale oo looga hortago COVID-19 ayaa lagu heli karaa oggolaanshaha Isticmaalka Xaaladda Degdegga ah (EUA), sida tallaalka bivalent kuwaasi oo ay ku jirto qayb Omicron ah oo ah SARS-CoV-2.

**MA QAADAN KARAA CANUGEYGU TALLAALKA COVID-19 EE PFIZER-BIONTECH, AMA TALLAALKA COVID-19 EE PFIZER-BIONTECH, BIVALENT ISLA MAR KALIYA SIDA TALLAALO KALE?**

Ma jirto wali xog loo gudbiyey FDA oo ku saabsan bixinta Tallaalka COVID-19 ee Pfizer-Biontech ama tallaalka COVID-19 ee Pfizer-Biontech, Bivalent isla mar kaliya sida tallaalo kale. Haddii aad ka fakareyso in canugaagu qaato Tallaalka COVID-19 ee Pfizer-Biontech ama tallaalka COVID-19 ee Pfizer-Biontech, Bivalent isaga iyo tallaalo kale, kala hadal khiyaarada bixiyaha daryeelka caafimaadka ee canugaaga.

**MAXAA DHACAYA HADDII DIFAACA JIRKA EE CANUGEYGA UU LIITO?**

Haddii canugaaga difaaca jirkiisu uu liito, waxaa lagu siin karaa xulashada ah in canugaagu qaato garoojo saddexaad oo ah taxanaha aasaasiga ah ee Tallaalka Pfizer-BioNTech COVID-19.

Dadka da'doodu tahay 5 jir ilaa 11 sano jir waxay qaadan karaan garoojo xoojin

ah oo ah Tallaalka COVID-19 ee Pfizer-BioNTech, Bivalent. Waxaa dhici karta tallaalkadu inayna siin difaac dhammaystiran oo ka dhan ah COVID-19 dadka difaacuugu liito, waana inaad sii wado inaad kadhigto canugaaga mid sii wada taxadarrada jirka si taasi gacan uga geysato sidii looga hortagi lahaa COVID-19. Waxaa intaas dheer, dadka xiriirka dhaw la leh canugaaga ama uu had iyo jeer ka ag dhaw yahay waa inay tallaalan yihiin sida habboon.

### **KA WARAN UURKA AMA NUUJINTA?**

Haddii ay gabadhaadu uur leedahay ama ay ilmo naas nuujiso, kala hadal xulashooyinka bixiyahaaga caafimaadka.

### **MIYAA TALLAALADAN UU CANUGEYGU KA QAADI DOONAA COVID-19?**


Maya. Tallaaladan kuma jiro SARS-CoV-2 kamana qaadi karo canugaagu COVID-19.

### **XAFIDO KAARKA TALLAALKA EE CANUGAAGA**

Marka canugaagu qaato tallaalka COVID-19 ee koowaad, waxaad heli doontaa kaarka tallaalka. Xasuusnoow inaad la timaado kaarka markii canugaagu uu soo laabanayo.

### **MACLUUMAAD DHEERAAD AH**

Haddii aad qabto su'aalo, booqo mareegta ama soo garaac taleefan lambarrada hoos lagu qoray. Si aad u hesho Xaashidii Xaqiiqda ee ugu dambeysay, fadlan iskaan garee koodhka QR ee hoos lagu qoray.

<b>Websayd caalami ah</b>	<b>Lambarka taleefoonka</b>
<p><a href="http://www.cvdvaccine.com">www.cvdvaccine.com</a></p> 	<p>1-877-829-2619 (1-877-VAX-CO19)</p>

### **SIDEEN INTAAN WAX KA BADAN U OGAAN KARAA?**

- Weydii bixiyaha tallaalka.
- Ka booqo mareegta CDC <https://www.cdc.gov/coronavirus/2019-ncov/index.html>.
- Ka booqo mareegta FDA <https://www.fda.gov/emergency-preparedness-and-response/mcm-legal-regulatory-and-policy-framework/emergency-use-authorization>.
- La xiriir waaxda caafimaadka dadweynaha ee dowlada hoose ama gobolkaaga.

### **XAGEE AYAA XOGTA TALLAALKA EE CANUGEYGA LAGU KEYDINAYAA?**

Bixiyaha tallaalka ayaa laga yaabaa inuu kusoo daro xogta tallaalka ee canugaaga Nidaamka Xogta Tallaalka ee deegaankaaga maxalliga ah/gobolka (IIS) ama nidaam kale oo loo qoondeeyay. Tani waxay xaqiijin doontaa inuu canugaagu helo isla hal tallaalka markii uu usoo laabto kuurada labaad ee taxanaha aasaasiga ah. Wixii macluumaad



dheeraad ah ee ku saabsan IISs booqo:

<https://www.cdc.gov/vaccines/programs/iis/about.html>.

### **MIYAA LA IGA QAADAYAA KHIDMAD LOOGU TALA MAAMULKA OO LOOGU TALAGALAY QAADASHADA TALLAALADAN COVID-19?**

Maya. Hadda waqtigaan bixiyuhu kaama qaadi karo qarashka kuurada tallaalka lagaamana qaadi karo qarash ku baxaya tallaalka oo jeebkaaga aad ka bixinayso ama qarash kale haddii un aad qaadanayso tallaalka COVID-19. Si kastaba ha ahaatee, bixiyeyaasha tallaalka ayaa dooni kara dib usoo celinta habboon ee qarashkii baxay oo ka imaanaya barnaamij ama qorshe loogu talagalay qarashka bixinta tallaalka COVID-19 kaasi oo loogu talagalay dadka qaadanaya tallaalka (caymis gaar ah, Medicare, Medicaid, Maamulka Agabyada & Adeegyada Caafimaadka [HRSA] COVID-19 Barnaamijka Dadka Aan La Caymin ee loogu talagalay dadka qaadanaya tallaalka ee aan la caymin).

### **XAGEEN USOO TEBIN KARAA KIISASKA KHIYAAMADA LAGA SHAKIYO?**

Dadkii ogaada xadgudubyo dhici kara oo ka dhan ah Barnaamijka Tallaalka ee COVID-19 ee CDC waxaa lagu dhiiragelinayaa ina y usoo tebiyaan Xafiiska Baaraha Guud, Waaxda Mareykanka ee Caafimaadka iyo Adeegyada Insaanka ayagoo soo garaacaya

1-800-HHS-TIPS ama <https://TIPS.HHS.GOV>.

### **WAA MAXAY BARNAAMIJKA TILLAABOYINKA KA-HORTAGGA EE MAGDHAWGA DHAAWACA?**

Barnaamijka Tillaabooyinka Ka-hortagga ah ee Magdhawga Dhaawaca (CICP) waa barnaamij heer federaal ah oo gacan ka geysan kara bixinta qarashka daryeelka caafimaadka iyo qarashyo kale oo gaar ah oo loogu talagalay dad gaar ah kuwaas oo si halis ah ugu dhaawacmay daawooyin ama tallaalo, ay tallaaladan ku jiraan. Guud ahaan, sheegasho waa in loo soo gudbiyo CICP hal (1) sano gudihii laga bilaabo taariikhda maalinta la qaatay tallaalka. Si aad wax intaa ka badan uga ogaato barnaamijkaan, booqo [www.hrsa.gov/cicp/](http://www.hrsa.gov/cicp/) or call 1-855-266-2427.

### **WAA MAXAY OGOLAANSHAHA U ISTICMAALKA XAALADDA DEGDEGGA AH (EUA)?**

EUA waa qaab lagu fududeeyo helitaanka iyo isticmaalka baddeecadaha caafimaad oo ay ku jiraan tallaalada inta ay socdaan xaaladaha degdegga ah ee caafimaadka dadweynaha sida safmareenka haatan socda ee COVID-19. EUA waxaa taageera Xoghayaha Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha (HHS) caddeyntiisa ah in daruufo jiraan loogu cudurdaarayo isticmaalka degdegga ah ee dawada iyo wax soo saarka bayolojiga ah inta uu socdo safmarka COVID-19. Wax soo saarka loo ansixiyay isticmaalka degdegga ah uma uusan marin isla nooca dib u eegidda ah ee FDA ka sidii

wax soo saar ansixin ka helay FDA.

FDA waxaa laga yaabaa inuu soo saaro EUA markii shardi gaar ah la waafaqo taasoo ay kujirto inaysan jirin baddallo la heli karo oo ku filan oo la ansixiyay. Intaas waxaa dheer, go'aanka FDA waxaa uu ku salaysan yahay guud ahaanshaha caddeynta sayniska ee la heli karo ee muujinaysa in baddeecadu wax-ku-ool u tahay kahortagga COVID-19 inta uu jiro safmareenka COVID-19 oo faa'iidooyinka la ogsoon yahay iyo



suurtagalka ah ee baddeecada ay ka badan yihiin halista la ogsoon yahay iyo suurtagalka ah ee baddeecada. Shardigaas oo dhan waa in la buuxiyo si loo oggolaado baddeecada in la isticmaalo inta uu jiro safmarka COVID-19.

EUA wuxuu shaqeynayaa inta ay shaqeyneyso caddeynta EUA ee COVID-19 taasi oo u cudurdaareysa isticmaalka degdegga ah ee wax soo saarkaan, haddii aanan la joojin ama aanan laga noqon (taasoo intaasi kadib wax soo saarka aanan lasii isticmaali kareyn).

## BIONTECH

Waxaa loo soo saaray  
Soo saaridda BioNTech GmbH  
An der Goldgrube 12  
55131 Mainz, Germany



Waxaa soo saartay shirkadda  
Pfizer Inc., New York, NY 10017

LAB-1486-6.2i

Dib loo eegay: 12ka Oktoobar 2022



Iskaan garee si aad u duubto in Xaashidaan Xaqiiqda la siiyey qofka tallaalka la siiyay si loo galiyo diiwaanka caafimaadka ee elektaroonigga ah/nidaamyada xogta tallaalka.

GDTI: 0886983000424